

Adiga ayey warqaddaan ku socotaa haddii ey carruur kuu dhigato iskuullada iyo dugsiyada xanaanada carruurta ee Norrköping

Qiimeynta Hey'adda caafimaad dadweynaha (Folkhälsomyndigheten) waa in khatarta faafidda isqaadsiinta caabuqa Korona (coronaviruset) ee Iswiidhan ey tahay mid aad u sarreysa.. degmada Norrköping waxey ka duuleysaa talooyinka hey'adaha masuulka ka ah. Hadafku waa in waxqabadyada demgamu ey u diyaar garoobaan isla markaas saameynta soo gaareysa noqoto midda ugu yar uguna macquulsan. Goobaha waxqabadyada oo dhan waxey si dhow ula socdaan xaaladda mar walba taagan.

Guriga jooga haddii aad xanuunsantihiin

Waa muhiim in carruurta iyo ardayda ey guriga ka joogaan iskuulka iyo dugsiga xanaanada carruurta haddii ey xanuunsan yihiin. Haddii aidga ama carruurtaada aad qabtaan xanuunyada hergab, qufac ama qandho/xumad waxaad isku daydaan in aadan dad kale la kulmin. Xattaa haddii aad dareymeysaan in aad wax yar xanuunsan tihiin. Waa muhiim in aanan dad kale la qaadsiin. **Guriga ku haaya carruurta haddii ey xanuun sanyihiin. Waana xanuun kasta.**

Haddii aad tuhmeysid in cunugaaga uu qaaday caabuqa Korona waxaad la xiriirtaa oo wacdaa Xarunta talo siinta dhinaca caafimaadka ee 1177. Calaamada infekshin waa xanuun neef mareenka ah, qandho/xumad iyo qufac. Haddii aad qabto su'aalo la xiriira caabuqa Korona oo kaliya waxaad wacdaa Nambarka Xarunta warbixinta qaran ee 113 13.

Sida aad uga hortageyso in ey isqaadsiinta faafto

- Dhaq gacmaha marar badan si fiicanna ugu dhaq saabuun iyo biyo.
- Guriga jooga haddii aad xanuunsantihiin
- Qufac ama ku hindhis xagasha/laablaabka gacanta.
- Isticmaal warqadaha diifka leyskaga siimiyo hal mar haddii aad u baahato in aad diif iska siimiso.
- Masaafu ha idiin dhaxeyso adiga iyo dadka kale kana fogoow in aad gacanta ku salaanto

Bogga norrkoping.se waxaa ku jira warbixin ku saabsan caabuqa Korona iyo leeman kugu xiraya hey'ado kale. Warbixinta si joogta ah ayaa loo cusbooneysiiaa.

<https://www.norrkoping.se/information-om-coronaviruset.html>